**XAFIISKA QARAMADDA MIDDOBAY U QAALIBLSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)**

**WAR-SAXAAFADEED 07/2014**

# Hadal-qoraal uu ka soo saaray Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayah Guud ee Qaramadda Middoobay u Qaabilsan Soomaaliya Shirarka Dowlad dhisidda ku saabsan ee ka socda Baydhabo

Muqdisho, 3 Maarso 2014 - Ergaygga-Gaarka ah ee Xoghayah-Guud ee Qaramadda Middoobay u Qaabilsan Soomaaliya, Nikolas Kay ayaa si hoose ula socda arrimaha ka dhacaya Baydhabo aarimahaas oo ay ku jiraan natiijada maanta ka soo baxday Shirka Baydhabo. Sdoo kalena waxaan arkay jawaabta ka soo baxday Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ee ku aadan shirkaas.

“Waxaan oogu baaqayaa dhammnan dhinacyadda ay arrinta khusayso in ay si wayn taxadir ooga muujiyaan ficil kasta oo wax u dhimi kara Nabadda “ ayuu yiri Ergaygga Gaarka ah Kay. “

“Sanaddan, waxaa aad muhiim u ah siddii lagu heli lahaa Soomaaliya oo mid ah uuna ka hirgaly Nidaamka Federaalka. Dalka waxaa uu xal u helay caqabaddo faraban oo dhowaan dhacay asaga oo adeegsanaya habka wada hadalka iyo isu tanaasulka ku dhisan”

“Waxaan ku dhiiri gelinayaa oday dhaqmeedyadda, Siyaasiyiinta, iyo dhammaan daka ay arrinta khusayso in ay si dhab ah u wadaan habka wada hadalka siyaasadeed ku dhisan ee loo wada dhanyahay kuna qotoma xurmeeynta Dastuurka ku-meelgaarka, iyo Heshiisyadda jiraba.” Ayuu ku daray Ergaygga gaarka ah. “Qaramadda Middobay waxay sii wadi doontaa taageeridda ay u hayso dadaaladda ay sii waddo Dowladda Federaalaka ah ee Soomaaliyeed, kuna aadan dib uheshiisiinta”.

“Xaaladda ka jirta Bayshabo waxay aad u ifisay baahidda deg-dega ah ee loo qabo in Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ay dedejiso shaqadeedda ku aadan habka dhowlad-dhisidda Soomaaliya, waana in uu noqdaa hab loo wadda dhanyahy, oo ay ku jirto in la dhigo qorsho howleed tafa-tiran, hadana wakhtiyaysan, kuna aadan samaynta Dowlad Goboleedyadda, dhamaystirka Dastuurka, Sidoo kale Dimoqoraadiyeynta dalka marka la gaaro sanadda 2016” ayuu yir Ergaygga Gaarka ah.

Ergaygga Gaarka ah waxa uu sii wadi doonaa arrimahan muhiimka ah asaga oo la kaashan doona saxiibadda Caalamka ama Jaalayaasha caalamka sida AMISOM, IGAD, iyo EU da.